

## FAAII'DOOYINKA WAXBARASHADA DIBEDDA

### Waxbarasho Sare

Ardaydu waxay baran karaan mawduuc kasta oo ka socda aragtiyo kala duwan iyo deegaan cusub marka ay kasbayaan dhibcaha tacliimeed ee laga rabo xagga maadada weyn, yar, ama tacliinta libaralka ah.

### Luqadda

Ardaydu waxay heystaan fursad ay si hufan oo sax ah u baran karaan luqad haddii dibedda ku dhex galaan.

### Waxbarasho Isdhexgal Dhaqan

Waxbarashada dibedda waxay xoojisaa kartida ardayga inuu la falgalo dad leh dhaqanno kala duwan.

### Horumarinta Shakhsiga

Ardaydu waxay kordhistaan kalsoonida nafta, qaangaadhnimo, iyo aqoonsi dunida ah.

### Horumarinta Shaqada

Waqti lagu qaato dibedda waxayna kor u qaadaa resumiga xagga khibrad caalami ah waxayna u ogolaaneysaa in ay balladhiso hab xirfadeed soojidasho leh ee loo shaqeeyayaasha mustaqbalka.

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Macluumaad dheeraad ah waxaa laga heli karaa meesha **UMabroad.umn.edu/parents**.


GO SAFE

230 Heller Hall
271 19th Ave. S.
Minneapolis, MN
55455-0430

Phone: 612.626.9000
Toll Free: 888.700.UOFM
UMabroad@umn.edu
**UMabroad.umn.edu**


Macluumaad ku saabsan waxbarashada Dibedda ee

# WAALIDIINTA



LEARNING ABROAD CENTER

UNIVERSITY OF MINNESOTA

## ISKU XIGIDDA CAAWIMADA



### 1. Sahamin

Kala hadal ardayda xagga ahdaaftooda iyo baahiyahooda ee ku saabsan khibraddooda dibedda. Ka baro cilmi oo cusub? Horumarinta shaqada? Safarka? Sahaminta hidda? Fursado deeq waxbarasho? Xarunta Waxabarashada Dibedda (LAC) waxay weydiisaa ardayda isla su'aalahaas iyadoo kala talisa helidda barnaamija ugu fiican xagga ahdaaftooda shakhsi iyo shaqo.

### 2. Doorasho

Waydii ardaydaada xagga doorashadooda. Maxay u doorteen barnaamijkan? Maxay rajeynayaan yihiin ay filayo? Maxaad ay rajeynayaa in ay helaan ka-aragnimada?

### 3. Bixitaan

Ardaydu inta badan waxay dareemaan culays iyo kalsooni ka yar markii ay markii hore ay bilaabeen tallaabooyinka inay dibada tagaan. Ku celceli in aad dareento in ay ku guulaysan doonaan iyo in labadaba LAC iyo adiguba aydin halkaas joogi doonaan marka ay caqabado soo baxaan. Waxaa lagugu marti qaadi doonaa inaad timaado hanuunin ka horreysa bixitaanka oo lagu bixiyo dhamaan barnaamijyada LAC.

### 4. Gudaha Dalka

Xasuuso, keliya marka ardaygaagu u baxo kaam xagaa oo soconaaya muddo todobaad ah, iyagu aanay ku wicin marka ay ku hareereysanyihiin asxaabtooaa ee ay dareemayaan wax cajiib ah oo ku saabsan waayo-aragnimo. Waxaad tahay nidaamka taageeradooda, oo adiga ayey kugu tiirsanaan doonaan marka ay wareeraan, cidloobaan, ama nuglaan. La hadal ardaydaada oo weydii si loo hubiyo maalinta ku xigta hadalka Pep-ka. Daruurta dareenku way ku dhaaftaa oo arrimuhu si weyn ayey u hagaagaan. Ku dhiiri geli in ay la xiriiraan shaqaalaha maxalliga ah wixii arwar ka qabaaan.

### 5. Dib-Usoo-Gelid

Waydii ardaydaada su'aalo gaar ah oo ku saabsan xagga waayo-aragnimadooda. Maxay arkaan marka au ku socdaan jidka fasalada ama meesha intarshibka ah? Sidii ayey ahayd cuntadu? Luaqadu? Asxaabta martigeliyaha-qaran? Saaxiibada Ameerikanka? Ardayda qaarkood waxa laga yaabaa inay qaataan waqti dheeraad ah si ay u muujiyaan madax bannaani. Arday kale waxaa laga yaabaa in ay ku tusaan sawirro kulanaqaybsadaan sheekooyin ka yimid waqtigoodii dibedda. Ku dhiiri geli ardayda si ay ugu fikiraan sida waayo-aragnimadni ay u wanaajisey xirfadahooda iyo kalsoonidooda iyagoo isku diyaarinaya inay galaan xoogagga shaqaalaha ka dib qalin jebinta.



> “Ma jirto wax la mid ah khibradda. Runtii waxay la socotaa inta la nool yahya. Waxay weliba muhiim ugu egtahay tahay in ardayda Mareykanka ah inay dibedda u tegaan iyadoo aynu mararka qaar ku xayirmanno ‘xunbo.’ Tani waxay caawisaa inay abuurto daaqado, aan ahayn muraayado, xaggeenna.”
>
> – *Abby Carpenter*
> arday ku jira UofM

# Macluumaadka Waalidiinta

Waxbarashada dibadda waxay awood u leedahay in ay noqoto mid ka mid ah dhacdooyinka ugu xiiso badan oo la taaban karo nolosha ardaygaaga. Waa fursad lugu baran karo wixii ku saabsan dal kale, dhaqankiisa, iyo dadkiisa, iyagoo helaya dhibcaha tacliinta sare ama ka qayb qaadanaya fursad waxbarasho oo aan sidan dhibco. Waayo-aragnimadu waxay siisaa fursad inuu qofku isbarto marka laga eego aragti ku saabsan macnaha guud ee beesha caalamka. Barashada dibadda waxay xoojin kartaa resumiga iyadoo la kordhinaayo fursadaha mustaqbalkiisa shaqo. Waalidiinta iyo xubnaha qoyska ayaa ah taageerayaasha aasaasiga ah ee waayo-aragnimada ardayga ee caalamiga ah-sidaas darteed waa muhiim inaad fahamto sida uu yahay habsocodka waxbarashada dibadda.

## XAFIISKA GAARKA U AH ARDAYDA

Waalidku waa taageerayaal aad u muhiim ah xagga waayo-aragnimada caalamiga ah ee ardayda. Xarunta Waxbarashada Dibedda waxaa uu xoogga saaraa inuu ardayga u noqdo xuddun. Waxaan ku dadaaleynaa inaanu ku dadaalno la xidhiidhka iyo diridda dhammaan waraaqaha ardayda. Ardaydu waa shakhsiyaadka ku sugan dal dibadeed waana ka mas’uulu naftooda. Xagga waayo-aragnimadayada, diyaarinta arday madax-banaani waxay ka caawisaa inay iyaga ka dhigi karto kuwo u xuubsiibta guuleysi dalka dibedda.

Inkasta oo aanu ku faraxsan nahay in aanu la kulanno waalidiinta si looga jawaabo su’aalahooda, xaalado badan, xor uma nihin inaanu macluumaad la wadaagno xagga Xeerka Qoyska ee Xuquuqda Waxbarashada (FERPA).

Waxaanu kugu dhiirigelineynaa inaad wixii su’aalo ah soo mariso ardaygaaga, iyadoo isagu/iyadu yahay/tahay wakiilka qoyska. Marka su’aalaha aad ardaygaaga la wadaageyso, waxaa laga yaabaa inay fiicnaan lahayd in aad ka wada hadashaan wax ku saabsan mawduuc gaar ah iyo waxa ay saameyn jawaabo kala duwani ku yeelan karaan. Tani waa habsocod hawlgal cajiib ah oo caawini kara inaad cunugaagu gaadho wareega xiga ee qaangaadhnimada oo noqdo qof weyn oo madax-bannaan.

## FERPA

Isla sharciyada siinaya waalidiinta iyo ardayda inay helaan oo gacanta ku hayaan diiwaanka waxbarashada ardayga inta lagu jiro lahaanshaha kala wareegga diiwaanka dugsiga hoose iyo sare loona wareejinayo heerka kulliyadda. Sida uu qabo FERPA (loona yaqaanno Waxkabdeddelka Buckley), ardayda ku jirta jaamacadda waxaa loo arkaa inay yihiin dad waaweyn oo mas’uul ah waxaana loo oggol yahay inay goostaan cidda heli doonta macluumaadkooda shakhsiyeed. SMarka la eego harcigan hoostiisa, waalidiinta doonaysa inay helaan nuqul ka mid ah diiwaanada waxbarasho ama dhaqaale ee ardaygiisu way yeeli karaan sidaas ardaygoodu saxiixo foomka sii-deynta. FERPA, oo ay la socdaan Xeerka Macluumaadka Gaarka ah ee Minnesota, oo noqda udub dhexaadka Siyaasadda Rejantiska ee ku saabsan Helitaanka Diiwaanka Ardayga.

Iyadoo sharciga fadaraalka FERPA uu ka hor istaagayo LAC la wadaagga macluumaadka ku saabsan arday gaar ah ardayga, waxaa lagugu dhiirigelinayaa in aad dhexgasho khayraadka onleynka ah iyo xafiiskayaga, iyo inaad la hadasho ardaygaaga.

## LACAGTA IYO BIILASHA

Ardayda waxaa biilasha loo mariyaa nidaamka bixinta UofM-sida ay tahay kooraska kaambaska. Ardaygaagu waxaa uu heli doonaa fariin iimayl ah oo ku saabsan waqtiyada kama dambeysta bixinta lacagta. Wixii macluumaad ah oo ku saabsan xagga lacagta, booqo webseydkayaga.

## HELID DIBADEED

Waxaan dhiirigelinaa ardayda naafada ah, xagga jidhka ama qarsoon, si ay u sahamiyaan fursadaha dibadda. Xarunta Khayraadka iyo Naafanimada LAC waxay gacan ka geysataa helitaanka waxbarashada dibedda ee ardayda naafada ah.





